

MAXAAD NAFTAADA U DHIIRI GALIN WAYDAY?

| W/Q. Cadnaan Yusuf Ibrahim (Cadnaan Kaafi)

MAXAAD NAFTAADA U DHIIRI GALIN WAYDAY?

"Dhiiri galinta aad naftaada dhiiri galinayso ayaa ka saamayn badan dhiiri galinta ayay dadka kale ku dhiiri galinayan" -Cadnaan Kaafi

Sidda aynu wada ognahay dhiiri galintu waa mishiinka dhaqaajiyad bini'adanka, kaas oo ku riixa in ay fuliyaan amaba qabtaan hawl ay ku guda jireen, si kale haddii aynu u dhigno waxa aynu oran karnaa dhiiri galintu waa shidaalka inoo suurto galiya in aynu ka midha dhalino hadaf aynu ka lahayn hawl aynu haynay.

Haddii aad doonayso in aad safar u baxdo waxaad marka kowaadba ka fikirtaa in aad haysato sahay kugu fillan, oo kuu suurto galisa in aad gaadho goobtii aad rabtay. dhinac kale haddii aynu ka eegno, tusaale haddii aynu rabno in aynu u dalxiis tagno buurta Daallo, waxa aynu diyaarsana gaddiidkii aynu ku tagi lahayn goobtaas markaas ayaynu ka fikirnaa ma baabuur mise diyaarad ayaynu raacnaa, siddoo kale aynu iswaydiinaa shidaal intee leeg ayaynu ubaahanahay si aynu u gaadhno goobtaas?. Haddii ayaynan buuxsan taangiga shidaalka gaddiidka aynu raacayno ma u malaynaysaa in aynu gaadhi doono goobtii aynu rabnay?, jawaabtu waa maya.

Haddaba ma odhan karnaa dhiiri galintu waa shidaalka kaliya ee ina gaadhsiin kara hadafkeena iyo himiladeena?, dadkuna sidda ay u kala dhiiranyihiin ayay ugu kala dhawyihiin guusha, taa waxa inoo cadaynaysa qofna waxaa u haystaa shidaal ku fillan oo uu ku gaadho meeshaa uu rabo, ka kalana ma haysto shidaal ku fillan, bal aan isku dayo in aan soodhaweeye fahanka, tusaale ahaan haddii aad tiraahdo waxaan rabaa in aan ka qayb galo tartanka baabuurta oo aad shidaal kugu fillan ku shuban waydo baabuurkaga, ma umalaynaysaa in aad tartankaa ku guulaysan doonto?.

Haddaba nolashu waa tartankaas baabuurta oo kale dhiirananta ayaana lagu kala tagay, haddii aanad noqon qof dhiiran oo ay ka go'antahay qabashada waxa uu doonayo, hubbaal waad ku guul daraysan doontaa geeddiga guusha, si aanay taasi u dhicin waa inaad la timaadaa dhiiranaan iyo go'aan adag siddoo kale aanad u ogalaan cidna in ay ku niyad jabiso.

Dhiiri galinta waxa ay ka timaadaa laba ilood oo aad u waawaayn mida waa dhiiri galinta qofku naftiisa dhiiri galinayo, ta labbaadna waa dhiiri galinta qofku ka helayo dadka ku xeersan amaba deegaanka uu ku noolyahay. labbada qayboodba aad ayay muhiim ugu yihiin nolasha bini'aadanka, haddaba sidda ka muuqata magaca dhiganahan kooban waxa aynu soo qaadan doona qaybta kowaad.

Sidda xigmada aynu halka sare kusoo aragnay inoo tilmaanayso dhiiri galinta qofku naftiisa dhiiri galinayo ayaa ka saamayn amaba waxtar baddan, dhiiri galinta dadka kale dhiiri galinayan.

Wali naftaada ma dhiiri galisay?, ma u sheegtay aduunka in wax adagi aanay jirin, wax shalay aan caqliga galayn maanta ay caqli gal tahay, wax aan maanta caqli gal ahayn barri ay caqli gal noqon doonto?. wixii aad isku adkaysana ay kugu adkaan doonan, aduunka waxa badalay waa su'aal uu qof iswaydiiyay, bacdeen uu maskaxda ka shaqysiiyay xalkeedii iyo jawaabteedina raadiyay kuna guulaystay, dadka dunida ku noolina ka faa'idaysteen kuna mahadiyeen.

Shalay in la duulo oo dayaxa latagaa waxay ahayd wax aan caqli gal ahayn mantana waxaa loo hirdamayaa in guryo laga dhisto oo lagu dul noolaado. shalay caqli gal may ahayn in laydh la shito oo dunidu oo dhami iftiinto, maantana waad arkaysaa sida ay dunida dhami u bildhaamayso, dhamaan intaas iyo inkabadanba way dheceen ragbaana u fikiray oo maskaxda ka shaqaysiiyay iyaga oo caqabado badan kala kulmay bulshadooda lana soo daristay niyad jab badan, lakin ismay dhiibin ee waxay noqdeen dad u hal-gama rumaynta riyooyinkooga, wadigaa arkaya maanta sidda lagu faanayo iyo baasha dahabka ah ee ay ka galeen dunida.


Waxaa iswaydiin mudan maxad isku dhiibtaa marka ay niyad jab yari kula soo darso amaba wax kuu haggaagi waayaan?, Waxaad ogtahay in guushu ayna ahayn wax si fudud lagu gaadho ilaa iyo rafaad iyo dhib loo maro mooyee, maxaa kaa dhigay qof jilicsan oo sabirku ku yarhay?, ma waxa aad ka baqaynaa guul darada?, halkee ayay wax ka khaldanyihiin?, maxaa kaa dhigay mid caajis ah oo wahsi badan, qayrkaa ayaa hoggaanka kuu haya oo aad ku dayataa, halkii adiga lagugu dayan lahaa, sidda xayawaankii oo kale ayaa inta qoorta lagaa xidhay lagu hagayaa, waa qayrkaa waxa ku jeedinaya ee maskaxda kula xiyaaraya adiguna war mooge aayad tahay.

Ma waxa aad sugaysaa in ay dadku ku dhiiri galiyaan oo ay markasta oo aad niyad jab dareento aad raadiso qof ku dhiiri galiya?, ma u malaynaysaa in dadka oo dhami ku dhiiri galin doonan hal marna kuwada garab istaagi doonan.

Waa maxay cudurdaarkan beenta ah ee aad naftaada ugu sheekaynayso, sidda in aanad haysan cid ku dhiiri galisa, lacag aad wax ku qabsato, in aanad waxba qaban karayn iyo qaar kaloo badan.

Maxaad uga been sheegaysaa nimcooyinka allah swt kugu galadaystay ee tiro beelka ah, ee ay kow katahay garashada iyo garaadka ee aad ku kala garanayso waxa saxda ah iyo waxa khaladka, awoodada jismi iyo taada maskaxeed, haddii aad nasiib u yeelatay in aad haysato lixdadii lixaad caafimaadna aad qabto maxaad u inkaraysaa eed la cabadaysaa maxaa kaa maqan, ilahay ugu mahadi ku siiyay nimcooyinkas kana faa'idayso waa imtixaane lagayabaa in ay kusoo marto maalin aanad haynin.

Adiga unbaa nolashada wax qabsan kara guulna gaadhi kara, cid kuu shaqaynaysaa ma jirto ee adigu hurdada ka kac oo iska dhig qof jira oo nool. in aad noqoto qof naftiisa dhiiri galiya waa habka kaliya ee aad guulo badan ku gaadhi karto, waxaana kuu fududaanaya dariiqa aad guusha umarayso maxaa yeelay waxaad tahay qof dhiiran oo u kulul in kuu kamidho dhaliyo riyadiisa.



7 HAB OO AAD NAFTAADA KU DHIIRI GALIN KARTO

1. Samayso Qorshe Nolaleed:



Waxaa mushkalad aad u wayn ah hadaanad nolasha tan hadafba kalahayn, oo aad iska seexato, iska soo toosto, cunto cabto, meel aad usocotaba aanad aqoon. Maxaad jeceshahay in aad noqoto mustaqbalka?, maxaad doonaysaa in lagugu xasuusto oo aad dunida kusoo kordhiso?, samayso hadaf iyo meel aad rabto in aad xaqiijiso, kolay HAA way jirtaa riyo iyo hadaf aad leedahay oo ku gubaya, fikir aad doonayso in aad soo kordhiso oo dadkoo anfaca.

Riyadu waxa ay ahaataa riyo lakin marka aad go'aansato in aad waraaq ku qorto way isbadashaaa si ay u noqoto hadaf, la kaalay qorshe, qor oo hoosta ka xariiq waxa aad rabto in aad xaqiijiso oo aad gaadho, kala haraysii oo sidda ay ukula muhiimsanyihiin ukala qabo.

2. Samayso Deegaan Dhiiri-galineed:



Noqo qof markastaba ay ku xeeranyihiin waxyabo ku dhiiri galinaya, la soco dadka hanka sare leh, dhagayso qudbadaha ay jeediyaan dadka guulaystay iyo dadka

dhiiri galiyayasha ah, akhri sheekooyinka iyo xigmadaha dadka guulaystay, samayso xigmado iyo hadala aad adigu leedahay ood naftaada kula hadlayso, taasi waxa ay kaa caawin doontaa in hadalada aad samaysay ay noqdaan qaar ku dhiiri galiya sidoo kale ay noqdan xeer naftaada qabanay kaana fogaynaya dib noqoshada.

3. Ha Niyad Jabin:



Marka laga hadlayo niyad jabka, waxaynu ognahay waxkasta oo la rabo in la qabto in laga qabto niyada, sidda "Nabigeena Maxamed (NNKH) inoo sheegay in camalku yahay niyada, waxkastana lagu qabto niyad".

Haddaba haddii aad niyad jabto ma umalynaysaa in aad rumayn karto riyadaadii, iska ilaali niyad jabka, markasta oo aad dareento niyad jab, kala hor tag dhiiri galin usoo bandhig naftaada guulihii hore aad gaadhay, isasoo hor dhig abaalmarinadii lagu siiyay shahadooyinkagu, una sheeg naftaada in ay guulahaa gaadhay, sidoo kale u sheeg in ayna ahayn xili ay dib usoo noqoto, lahadal naftaada cadawga ha ii jabin ku dheh, horana usoco oo dib hasoo eegin.

Sheekh Mustafe ayaa isaga oo halganka nolasha ka hadlaya waxa yidhi " Nolashu waa halgan inta halganka lagu jiro dhib, baqasho iyo mushkilad ayaa imanayaysa, waana in loo sabro oo loo adkaysto loona dulqaato, oo yaan lagu talo galin in xalwad la isku siinayo halganka nolasha ee qofku ku talo galo in uu dhibaatooyinka u sabro".

4. Abaal Mari Naftaada:



Naftaadu waa ta kaliya ee nolasha guul kuu horseeda ama guul daro, wata ka danbaysa in aad gaadho guulo badan oo aad maanta ku faanto, wata heeganka u ah una hirdamaysa rumaynta riyooyinkaga.

Markasta oo aad guul gaadho, umahad celi naftaada, una sheeg in ay qabatay hawshas kana danbaysay guusha, si naftaada abaal marin, tusaale ahaan ku dheh " Haddii aad hawshaa qabato waxa aan ku gayn doonaa dalxiis, buurta Daallo ayd tagi, amaba meelaha ugu quruxda badan deegaankaga". markasta naftaada heshiid la gal, ha dulmin naftaada xil ayaa kaa saran, daryeel cafimaadkeeda, nadafadeeda iwm. la saxiib oo iyada uun la nolow iyada ayay ku xidhantahay noloshadu, ta kaliya ee aan ku cidlaynayn waa iyada dhib iyo dheefna kula qadanaysa, iyada ayaa lagugu abuuray.

5. Noqo Qof Faraxsan:



Farxadu waa ta kaliya ee kuu suurto galinaysa in aad horumar gaadho, markasta oo aad farxad muujiso waxa kuu fududanaysa in aad kasbato dadka oo dhan oo aad

noqoto mid la jeclaysto ag joogiisa, dadkoo dhana agtiisa ku dareemaan farxad iyo daganansho. Qosal oo dhoole cadee marwalba waxad ka guulaysan doontaa dhaman cadowgaga oo dhan, maxaa yeelay markasta oo aad farxado, qosasho, dhoole cadayso cadowgagu waxa ay dareemi doonan niyad jab, siddaas ayanad kaga guulaysan doontaa.

6. Ha Isbar-bar Dhigin Dadka Kale:



In aad is barbar dhigto dadka waxa ay kamid tahay mushkiladaha ugu waawayn ee kaa hor istaagaya in aad gaadho guul iyo horumar, tusaale ahaan haddii aad tiraahdo; waxaan ahay fiqiir danyar ah marka lama tartarmi karo hebel/heblaayo oo iga taajirsan IWM. iska ilaali is barbardhigidu waa niyad jabiyaha kowaad ee hadafkaaga. una sheeg naftaada in taajirnimadu ayna ahayn lacagta iyo daaraha ee ay tahay maskaxda, inta aad leedahay maskax caafimaad qabta xiskaaguna uu jiro, waxkastaba gacantada ayay ku jiraan kaliya u samir oo ilahay talo saaro.

Haddal uu Sh. Mustafe leeyahay ayaa waxa uu yidhi "Qofka bini'adanka ahi mar mar qudha ayuu jabaa. Markaasna waa marku isdhiibo ee uu yidhaahdo waa lagaa cilmi badanyahay, waana lagaa xoog badanyahay".

7. Caawi Dadka:



U naxariiso dadka si uu allah kuugu naxariisto, caawi dadka baahan waa abaal aad dhigatay aakhiro iyo aduunba, adigana marka aad baahantahay ayaa lagu caawin doonaa, maxaa yeelay aduunku waa hadhkaa labbadisa galin, ka hayana ma sii hayo ka la'na masii la'aado. Isku day in aad caawiso qofkasta oo gargaar ku biday, masuuliyad ayaa kaa saaran in aad wax u qabato sidoo kale aad horumariso dadkaaga, diintada iyo dalkaagaba.

Dhiiri gali dadkaga, qofkasta oo fikir kuula imaada niyada u dhis garabna sii. xigmad uu leeyahay qoraaga dhiganahan kooban ayaa waxa uu leeyahay "Hal eray oo afkaaga kasoo baxa amaba ficil aad samayso ayaa qof rajo iyo guul ku abuuri kara amaba niyad jab iyo guul daro u horseedi kara". -Cadnaan Kaafi

"Farqiga u dhexeeya innaga iyo reer galbeedku waa, iyagu waxa ay dhiiri galiyaan kooga guul-daraystay ilaa iyo inta uu guulaysanayo. Innaguna waxa aynu niyad jabinaa keena guulaystay amaba fikiraya ilaa iyo inta uu guul-darysanayo halkaasna uu ku baaba'ayo".

Toddobadaa qoddob waxa ay anfici doonan nolashada, waa qoddoba aan anigu tijaabiyay kuna guulaystay iina horseeday badhaadhe, tijaabi oo ku dhaqan waxaad dareemi doontaa isbaddal aad u balaadhan. Isku day in aad naftaada dhiiri galiso, ogaatana wax walba oo ay ku fiicantahay, raadisana hibooyinkaga. Waxaad

ogaataa qofna ma dhiiri galin kartid waxna uma qaban kartid ilaa iyo aad aadigu isbaddal la timaado.

Gunaanadkii waxa aan kusoo koobayaa, mustaqbalkagu gacantaada ayuu ku jiraa, loomana baahna in aad cidd udaba fadhiisato rumaynta riyooyinkaga, go'aanku waa halkaaga, noqo qof hansare leh xigmad uu leeyahay Mubarak haadi ayaa waxa uu yidhi " Kol hankaagu haddu sareeyo, adna hagrasho waayi maysid, han-yare ku dhiba waayi maysid, han jabaad caddow waayi maysid, halyeeynimo haddaanad muujin dufaacan himilooyinkaga, hadafkaad lahayd gaari maysid". -Mubarak Hadi

Waxaan ku soo gabagabayn doonaa meerisyo kamida maansadii Abwaan Xasan Daahir Ismaaciil (Weedhsame)
uu lahaa;-

* Qof baad tahay guul abuura
* Qof baad tahay guri yagleela
* Qof baad tahay gaar ahaanta
* Ku gaajo baxo oo is keenaa
* Gankaa kuma dheera caaro
* Aqoontaaduna ma gaabna
* Ma gaagaxin aayahaagu
* Dadkaagana kama go'aysid
* Dalkaaguna kuma gariifin
* Galbeed yurub kuma yeedh.



FG. Dhiganahan yar ee kooban waxaa qoray walalkin cadnaan yusuf Ibrahim (cadnaan Kaafi), waxa aan ugu talo galay in aan ku baraarujiyo dhallinyaradeena ay dhiiri galin la'aantu laabtooda biyo dhigatahay, una sheego in ay iyaga ku xidhantahay waxkastaba, isku day in aad adigu naftaada dhiiri galiso, hana karaadin dhiiri galin dadka kugu xeeran, maxaa yeelay haddii aad adigu is dirto iyo haddii ay dadku ku diraan keebaad wax baddan qaban kartaa?, jawaabtu waa marka aad adigu is dirto.

"Waad ku mahadsantahay akhrinta aad akhriday dhiganahan yar"

Dhiganahan waa hanti maskaxeed, xuquuqdeedna waxaa iska leh qoraaga qoray, fadlan ilaali.

Wixii faallo iyo talo ahba fadlan iigala soo xidhiidh

Email: Adnankaafi2017@gmail.com amaba Tell: 0633510682 FB. Adnan Kaafi